Hawlaha firfircoonida fasaxa xagaaga 2017

Maxaad sameyn doontaa xagaagan? Hadii aadan qorshe gaar ah lahayn nagala qayb qaado hawlaha firfircoonida ee ay degmada diyaarineyso waxaad la kulmi doontaa saaxiibo cusub iyo kuwii hore. Tan ugu wanaagsan waa in waxwalbo yihiin lacag la'aan ku darso cuntada iyo casariyaha waa bilaash warash lagaama rabo.

Waxaan ku martigelineynaa dhamaan wiilasha iyo gabdhaha deggan degmada Lindesberg ee bilaabaaya dugsiga hoose dhexe xilliga deyrta (kuwaasoo dhashay 2002-2010). Hawlaha waxay ka koobanyihiin kuwo maalin joog ah iyo kuwo la dhaxaayo 2-5 maalmood. Waxaa la sameynaa hawlo da' walba ka qeybqaadan karaan goobo badan oo degmada ka mid ah Waxaad dalban kartaa 2 meelood iyo dugsiga barashada dabaasha.

Dalabka waxaad lagaaga qabanaayaa oo keliya shabakadeena www.lindesberg.se/sommarlov. hadaad caawino dalabka ku saabsan u baahantahay fadlan la xiriir dadka hoos ku qoran.

Caruurta aan lixaadkoodu dhameyn: caruurta aan lixaadkoodu dhameyn uma ballanqaadi karno inay ka qeyb qaadan karaan dhaqdhaqaaqyadoo dhan laakiin la xiriir qabanqaabiyeyaasha kaamamka si aad meel wax u wada dhigtaan. Meelaha qaar waxay noqoneysaa in qof caawiyo uu la socdo ama qof qoyska ka mid ah inuu caawiyo.

Dalabyada: Waxaad dalban kartaa 2 meelood iyo dugsiga barashada dabaasha. F:G dalbashada ka laabasho malahan. Boosaska kaamamka waa wax kooban sidaa daraadeed inaa boos heleysid cid damaanad qaadi karto ma jirto. Marka dalabaadka waqtigiisa dhamaado ayaa laguu soo sheegaa inaa ka qeyb galeysid iyo in kale.

Maalinka ugu dambeyso dalabka: kaamka 1-8. 2017-05-31 iyo kaamka 9-19. 2017-06-15

Gaadiid ku qaadida: kaam walba wuxuu cadeynaa sida laguu qaadaayo. Si aan u fududeyno in bulshada degmada oo dhan ka wada qayb qaadato waa inaan gaadiid diyaarinaa. Ka qeybgaleyaasha da'doodu tahay 13-15 jir waxaan u direynaa inay raacaan gaadiidka dadweynaha hadaan gaadiid si kale loo diyaarin.

Su'aalaha ku saabsan kaamamka iyo wixii la xiriira: eeg dadka lala xiriiraayo ee hoosta ku qoran oo kaam walba qaabilsan. F:G dalabaadka dadkaan lagama sameysan karo.

Suaalaha guud iyo caawinaada dalbashada:
Jonas Andersson 0581-811 66
Sara Sporre 0581-811 45
Björn Persson 070-654 37 37
Åsa Viggeborn 0581-811 01
Jimmy Eklund 072-201 33 59

Meylkaan ku soo dir: sommarlov@lindesberg.se (dalabka meyl laguma soo diri karo)

Kaamka 1
todobaadka 25. 18-21 juun
kaamamka xagaaga ee Bergslagsspelen
Wa sanadkii afraad oo Bergslagsspelen ay qabanqaabiso kaamamka xagaaga oo lagu qabto heeso, qoobkacaay, masrax iyo dhaqdhaqaaqyo kale oo fara badan oo xiiso leh. Waxaa isla kulmaaya saaxiibo hore iyo kuwo cusub oo ka kala imaanaaya waqooyiga gobolka.
degmada Lindesberg waxay iibsatay 20 boos. Taas ,macnaheedu waa in dalabka laga sameyn karo oo keliya dhaqdhaqaaqyada xagaaga toos loogama dalban karo Bergslagsspelen.
Da'da: 7-15 jir
Goobta: Finnsjöstrand, Järnboås, degmada Nora
waqtiga: qiyaastii 09.00-16.00. waxaa dhici karta in ilmaha waaweyn ay ku dhaxaan inta u dhaxeysa isniin iyo talaado. Waqtiga saxda ah waxaa la idin sheegaa marka go'aanka imaado.
Gaadiid ku qaadid: maalin walba waxaa lagaa soo qaadaa oo laguugu celinaa Järnboås, Löa, Stråssa, Storå, iyo Lindesberg. Dadka laga soo qaadaayo degmooyinka kale ee Lindesberg la keenaayo waa la abaabuli karaa sidii loo soo qaadi lahaa.
Abaabulaha: Bergslagsspelen, www.bergslagsspelen.se
Qofka lala xiriiraayo: Kristina Dybeck 070-603 82 03
Maalinta ugu dambeysa dalabka: 2017-05-31

Kaamka 2
todobaadka 25. 19-22 juun
todobaadka dhaqdhaqaaqa ee Lindesberg
dhaqdhaqaaqyo badan oo aad u xiise badan qof walbana ka qayb qaadan karo jawigana ku xiran. Maalinka ugu dambeyso waxaad la kulmeysaan saaxiibadiin ka socda Fellingsbro tartamo badan ayaad galeysaan. taageer Lindesberg!
Da'da: 10-12 jir
Goobta: waxay ka bilaabaneysaa garoonka Lindesberg
Waqtiga: 09.00-15.00
Gaadiid ku qaadid: gaadiid laysku qaadaayo ma jiro.
Abaabulaha: Degmada Lindesberg
Qofka lala xiriiraayo: Björn Persson 070-354 37 37
Maalinta ugu dambeysa dalabka: 2017-05-31

Kaamka 3
todobaadka 25. 19-22 juun
todobaadka dhaqdhaqaaqa ee Fellingsbro
dhaqdhaqaaqyo badan oo aad u xiise badan qof walbana ka qayb qaadan karo jawigana ku xiran. Maalinka ugu dambeyso waxaad la kulmeysaan saaxiibadiin ka socda Lindesberg tartamo badan ayaad galeysaan. taageer Fellingsbro!
Da'da: 10-12 jir
Goobta: Wuxuu ka bilaabanaa qolka kulanka ee dugsiga Ekbacken
Waqtiga: 09.00-15.00
Gaadiid ku qaadid: Gaadiid laysku qaadaayo ma jiro.
Abaabulaha: degmada Lindesberg
Qofka lala xiriiraayo: Jimmy Eklund 072-201 33 59
Maalinta ugu dambeysa dalabka: 2017-05-31

Kaamka 4
Todobaadka 25. 19-22 juun
Maalmaha farsamada ee Lindesberg
Afar maalmood oo dardar xoog ah leh oo aad kub aran doontid farsamooyin kala duwan. Waxaad wax ka baran doontaa barnaamijka loo yaqaan fotoshop, sida loo sameeyo bogga internetka, sida alxanka wax loogu kabo iyo wixii la mid ah. Wiilasha iyo gabdhahaba aad ayay xiise ugu leedahay.
Da'da: 13-15 jir
Goobta: dugsiga Linde iyo Masugnen ee Lindesberg
Waqtiga: 08.30-15.30, khamiis 08.00-12.30.
Gaadiid ku qaadid: Dadka laga soo qaadaayo degmooyinka kale ee Lindesberg la keenaayo waa la abaabuli karaa sidii loo soo qaadi lahaa.
Abaabulka: degmada Lindesbergs
Qofka lala xiriiraayo: Andreas Blom 076-551 52 24
Maalinka ugu dambeysa dalabka: 2017-05-31

Kaamka 5
Todobaadka 26. 26-30 juun
DanceCamp (xerada qoobkacayaarka) – waxaa loogu talo galay dadka qoobkacayaarka jecel. Xero maalmeed uu ka buuxo qoobkacayaar iyo dhaqdhaqaaqyo badan oo xiise leh. Todobaadka gudihiisa waxaad tijaabin doontaa noocyada qoobkacayaarka Street, Dancehall, Breaking iyo Contemporary dance waxaana hogaamin doona macallimiin qibrad u leh qoobkacayaarka. Aqoon hore inaa u leedahay malaguugu xiraayo. Kaamka waxaa lagu soo gabogabeynaa dhoolatus lagu soo bandhigi doono dugsiga Linde hoolka ku yaalo waxaadna ku casuumi kartaa qaraabadaada iyo saaxiibadaada.
sa'da: 13-15 jir
goobta: garoonka Lindesberg
Waqtiga: 09.00-15.00. Bandhigga waa jimce iyo hoolka dugsiga Linde 16.00–17.00.
Gaadiid ku qaadid: Dadka laga soo qaadaayo degmooyinka kale ee Lindesberg la keenaayo waa la abaabuli karaa sidii loo soo qaadi lahaa
Abaabulka: degmada Lindesberg
qofka lala xiriiraayo: Madeleine Carlsson 076-725 77 41
maalinka ugu dambeysa dalabka: 2017-05-31

todobaadka 26, 27
xerada tacabbirka ee Kloten waa lagu soo dhaxaa
xerada habeendhaxida ku caanka ah ee Kloten waxaad ku tijaabin kartaa xadkaaga. Waxaa ka buuxa dhaqdhaqaaqyo aad u xiise badan. Waxaa kuu dheer inaa ku dabaalan kartid, waxaad waqti la qaadaneysaa oo aad isla joogeysaan saaxibaadii hore iyo kuwo cusub

kaamka 6 26-28 juun. 7-9 jir
waalidiinta waxay u haystaan fursad ay kala qaybgalaan oo xitaa ay la dhaxaan ilmaha laakiin waa inaad iskiin u tagtaan ugana soo noqotaan Kloten haduu baska buuxsamo. Dalabka ayaad ku soo sheegeysaa sidaa rabtid.

Kaamka 7 28-30 juun. 13-15 jir
Kaamka 8 3-7 luulyo. 10-12 jir

goobta: Dugsiga xerada ee Kloten
gaadiid ku qaadid: Bas ayaa dadka ka qaadaayo Fellingsbro, Ullersäter, Frövi, Bertilsbro, Vedevåg, Lindesberg, Fanthyttan, Guldsmedshyttan, Storå, Löa oo geynaayo Kloten kana soo celinaayo.
Abaabulka: degmada Lindesberg
Degaanka: 2-8 qofood qolkiiba. Go'yaal hore u soo qaado.
Qofka lala xiriiraayo: Björn Persson 070-354 37 37
Maalinka ugu dambeysa dalabka: 2017-05-31

Kaamka 9
Todobaadka 27. 3-7 luulyo
Todobaadka isboortiga iyo dhaqdhaqaaqyada ee Lindesberg
Todobaad gudihiis ayaa waxaad ku tijaabineysaa dhaqdhaqaaqyo badan iyo isboorti xiiso leh Garoonka Lindesberg iyo nawaaxigiisa. Waxyaabo badan oo kala duwan ayaa la sameynaa waxaana ku soo gabo gabeyneynaa hal maalin dhan "gladiatorerna". Wax fiican ma ahoo!
Da'da: 7-9 jir
Goobta: Garoonka Lindesberg
Waqtiga: 09.00-15.00
Gaadiid ku qaadid: Gaadiid laysku qaadaayo ma jiro
Abaabulka: Lindesbergs VBK
Qofka lala xiriiraayo: Fia Lindstedt 070-282 37 00
Maalinka ugu dambeysa dalabka: 2017-06-15

Kaamka 10
Todobaadka 28. 10-14 Luulyo
Dalxiiska xayaawaanaadka ee Klockarsgården
Todobaad la soo joog xoolaleyda oo waqti la qaado xayawaanka isla markaana la kulan saaxiibo cusub. Waxaad tijaabin doontaa wax walbo oo laga qabanaayo xeryaha xoolaha sida fardo fuulka, haynta iyo cunto siinta xoolaha, raacxdid mooto afar lugoodleeyda iyo waxyaabo badan oo xiise leh.
Da'da: 7-9 jir
Goobta: Klockarsgården tuulo ku taalo Lindesberg banaankeeda
Waqtiga: Isniin-Khamiis 09.00-15.00. Jimce 09.00-13.00
Gaadiid ku qaadid: Laga bilaabo xarunta safarada ee Lindesberg. Dadka laga soo qaadaayo degmooyinka kale ee Lindesberg la keenaayo waa la abaabuli karaa sidii loo soo qaadi lahaa
Abaabulka: cayaaraha fardaha ee Klockarsgården
Qofka lala xiriiraayo: Johanna Klockars 070-360 97 85
Maalinka ugu dambeysa dalabka: 2017-06-15

Todobaadka 28,29
Dugsiga fardofuulka
Xerada fardo fuulka oo loogu talo galay dadka jecel xawaaraha, xamaasada iyo fardaha. Qasab ma ahan inaa qibrad u leedahay fardowadida. Laba maalmood gudahood ayaad wax badan ka baraneysaa fardaha, tartanka iyo sida loo wado garoonka tartanka fardaha ee Fornaboda. Wadajir dugsiga fardofuulka ee Örebro/Linde waxaad noqon doontaa xiddiga cusub ee cayaaraha fardofuulka!

Kaamka 11 10-11 luulyo. 10-15 jir
Kaamka 12 18-19 luulyo. 7-9 jir

Goobta: garoonka tartanka cayaaraha fardaha ee Fornaboda
Waqtiga: 09.00-15.00
Gaadiid ku qaadid: Laga bilaabo xarunta safarada ee Lindesberg. Dadka laga soo qaadaayo degmooyinka kale ee Lindesberg la keenaayo waa la abaabuli karaa sidii loo soo qaadi lahaa.
Abaabulka: Dugsiga tababarka tartanka fardaha ee Örebro/Linde
Qofka lala xiriiraayo: Lena Thybeck 070-555 82 02
Maalinka ugu dambeysa dalabka: 2017-06-15

Todobaadka 29. 30
Fardofuulka iyo kaxeynta fardaha Aysland
Ma rabtaa inaa keynta dhexdeeda ku wadid faraska Aysland, kaxeysid gaari faras ku xiran fardaha shetlandsponny isla markaana wax ka baratid xannaanada fardaha? Haday jawaabtu tahay haa markaa xeradaan aad ayay kuu anfaceysaa.,

Kaamka 13 17-19 luulyo. 10-15 jir
Kaamka 14 24-26 luulyo. 7-9 jir

Goobta: Västra Fallet, Storå
Waqtiga: 09.00-15.00
Gaadiid ku qaadid: Laga bilaabo xarunta safarada ee Lindesberg. Dadka laga soo qaadaayo degmooyinka kale ee Lindesberg la keenaayo waa la abaabuli karaa sidii loo soo qaadi lahaa.
Abaabula: Västra fallets turridning
Qofka lala xiriiraayo: Lena Jansson 070-879 18 21
Maalinka ugu dambeyso dalabka: 2017-06-15

Kaamka 15
Todobaadka 30. 24-26 luulyo
Xerada qoob ka cayaarka ee dadka ku cusub
Xeradaan waxaa loogu talo galay qofka jecel dhaqdhaqaaqa muusikada. Halkaan waxaad ku baraneysaa aas aaska Jazz, Hip-Hop iyo Showdans. Intaas waxaa kuu sii dheer inaa la kulmeysid saaxiibo cusub oo kugu fikir ah.
Da'da: 10-12 jir
Goobta: garoonka Lindesberg (Lokal: Sydläget) (lookaal: dhinaca koonfureed)
Waqtiga: 10.00–16.00
Gaadiid ku qaadid: Dadka laga soo qaadaayo degmooyinka kale ee Lindesberg la keenaayo waa la abaabuli karaa sidii loo soo qaadi lahaa
Abaabulka: Naadiga qalaamo rogadka ee Stråssa
Qofka lala xiriiraayo: Anna Nelson 070-658 69 69.
Maalinka ugu dambeyso ee dalabka: 2017-06-15

Todobaadka 30, 31
Xerada fardofuulka dadka uu ku cusubyahay
Todobaad gudihiis ayaa waxaad ku baraneysaa sida faraska loo kaxeeyo loona xannaaneeyo. Xeradaan waxaa loogu talo galay dadka uu ku cusubyahay oo aan weligood faras fuulin. Waxaan aad u jecelnahay in wiilashana ay ka qeyb qaataan.

Kaamka 16 24-28 luulyo. 10-15 jir
Kaamka 17 31 luulyo-4 agoosto. 7-9 jir

Goobta: Norslunds ridanläggning, Lindesberg
Waqtiga: 09.00-15.00
Gaadiid ku qaadid: Dadka laga soo qaadaayo degmooyinka kale ee Lindesberg la keenaayo waa la abaabuli karaa sidii loo soo qaadi lahaa
Abaabulka: Föreningen Linde Ridskola
Qofka lala xiriiraayo: Petra Holm 070-359 38 86
Maalinka ugu dambeyso dalabka: 2017-06-15

Kaamka 18
Todobaadka 31. 1-4 agoosto
Todobaadka wax soo saarida ee Siggebohyttan
Jawiga caanka ah ee bergslagen waxaad ku sameyn kartaa farxadaada wax soo saar. Hawlaha waxaa ka mid ah rinjiyeynta, farsamada gacanta iyo dugsiga maadeyska
Da'da: 7-12 jir
Goobta: Siggebohyttan
Waqtiga: 09.00-15.00
Gaadiid ku qaadid: Laga bilaabo xarunta safarada ee Lindesberg. Dadka laga soo qaadaayo degmooyinka kale ee Lindesberg la keenaayo waa la abaabuli karaa sidii loo soo qaadi lahaa.
Abaabulka: Degmada Lindesberg
Qofka lala xiriiraayo: Sara Sporre 0581-811 45
Maalinka ugu dambeyso dalabka: 2017-06-15

Kaamka 19
Todobaadka 32. 7-11 augusti
Xerada filimada ee Linde – Qofka doonaaya inuu filim sameeyo
qaad talaabadaada ugu horeyso ee Hollywood. Todobaad gudihiisa ayaa waxaad ku baraneysaa wax walbo oo la xiriira sida filimada loo sameeyo. Waxaad baraneysaa wariyenimo, sida filimada loo qaado, habeynta codka iyo iftiinka, sida laysugu xiro oo muusikada loo dul saaro iyo sida loo isticmaalo qalabka filimada. Todobaadka gudihiisa waxaa la idin siinaa doonaa inaa ku sameysaan filim dukumentaariyo ah oo ku saabsan todobaadka cayaaraha ee Linde iyadoo uu idinhogaaminaayo filim sameeye qibrad leh.
Da'da: 13-15 jir
Goobta: Garoonka Lindesberg
Waqtiga: 08.30-15.30
Gaadiid ku qaadid: Talaado ilaa jimce bas ayaa wuxuu ku geynaa garoonka Lindesberg ayadoo lagaa soo qaadaayo Fellingsbro, Frövi, Vedevåg iyo Löa, Ramsberg, Stråssa, Storå, Guldsmedshyttan, Fanthyttan.
Abaabulka: degmada Lindesberg
Qofka lala xiriiraayo: Thomas Hegefors 070-799 27 21
Maalinka ugu dambeyso dalabka: 2017-06-15

Dugsiyada barashada dabaasha

Baro dabaasha ama si fiica u sii baro xagaaga. Ka qeyb gal dugsiga barashada dabaasha.

Todobaadka 25-27. 19 juni – 7 juli
Dugsiga barashada dabaasha ee Lindesberg
Da'da: 7-15 jir
Goobta: Guriga dabaasha ee Energikällan, Lindesberg
Waqtiga: Isqorida iyo kala qaybinta kooxaha waxay ka dheceysaa Guriga dabaasha ee Energikällan 5 - 16 juun xilliyada ay furantahay meesha dabaasha. Waxaa lagu siin doonaa jadwal la xiriira barashada dabaasha ee dugsiga barashada dabaasha oo ka kooban maalin walbo 45 daqiiqo oo cashar ah muddo 3 todobaad ah (waa la hakinaa habeenka dhexbartanka xagaaga). Dugsiga dabaasha waxa uu ku egyahay 7 luulyo waxaa lagu soo xiraa xaflado. cunto ama casariye malagu siinaayo.
Gaadiid ku qaadid: gaadiid laguugu qaadaayo ma jiro.
Abaabulka: Besök Linde AB
Qofka lala xiriiraayo: soo dhaweynta guriga dabaasha 0581-815 30
Maalinka ugu dambeyso dalabka: 2017-05-31. Det går även att anmäla sig vid inskrivningen.

Todobaadka 25-27. 19 juun – 7 luulyo
Dugsiga dabaasha ee Fellingsbro
Da'da: 7-15 jir
Goobta: meesha dabaasha Fellingsbro
Waqtiga: Isqorida iyo kala qaybinta kooxaha waxay ka dhaceysaa meesha dabaasha ee Fellingsbro 17-18 juun xilliyada ay meesha furantahay. Markaas ayaa waxaa lagu siiaa jadwalkaaga dugsiga dabaasha oo ka kooban 1 saacadood oo cashar ah maaliln walbo muddo 3 todobaad ah. Dugsiga dabaasha waxaa la xiraa 7 luulyo waxaana lagu soo xiraa xaflado. Cunto ama casariye malagu siinaayo.
Gaadiid ku qaadid: gaadiid laguugu qaadaayo ma jiro.
Abaabulka: Fellingsbro GOIF
Qofka lala xiriiraayo: Mia Järpenberg 070-450 85 56
Maalinka ugu dambeyso dalabka: 2017-05-31. Marka lays qoraayo xataa dalabka waa la sameyn karaa.

Todobaadka 28-30
Dugsiga barashada dabaasha ee Frövi
Goobta: goobta dabaasha ee Prästryggen, Frövi
Waqtiga: Isqorida iyo kala qaybinta kooxaha waxay dhaceysaa isniin 10 luulyo. Markaas ayaa waxaa lagu siiaa jadwalkaaga dugsiga dabaasha oo ka kooban 1 saacadood oo cashar ah maaliln walbo muddo 3 todobaad ah. Dugsiga dabaasha waxaa la xiraa 29 luulyo waxaana lagu soo xiraa xaflado.
Cunto ama casariye malagu siinaayo.
Gaadiid ku qaadid: gaadiid laguugu qaadaayo ma jiro.
Abaabulka: Positiva Frövi
Qofka lala xiriiraayo: Caj Noren 070-540 50 13
Maalinka ugu dambeyso dalabka: 2017-05-31. Marka lays qoraayo xataa dalabka waa la sameyn karaa.